



## **Xusuusin: Waxaa soo dhawaanaya waqtigii kama dambeysta ahaa ee bakhtiyaa-nasiibka Dugsiyada Sarre, Xeerka Daryeelka Caafimaadka La Awoodi karo(Affordable Care Act)**

Waxaa soo socda labo taariikhood oo lagama maarmaan tahay in qoysasku ogaadaan :

**Bakhtiyaa-nasiibka Dugsiyada Sarre:** Ardayda rabta in ay wax ka barato Dugsiyada Sarre ee manhajka gaarka ah leh ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ama dugsiyada sarre ee badiilka ah waxa ay soo codsan karaan ilaa maalinta Jimcaha ah ee bisha Diisembar tahay 1da. Ardayda jecel inay wax ka bartaan Dugsiga Farsamada Gacanta Benson, Dugsiga Sarre ee Jefferson-Kulliyada Dhexe ama Metropolitan Learning Center iyaguna waxa ay ka soo codsan karaan halkan [this link](#).

Habka codsiga bakhtiyaa-nasiibku wuxuu bilaabmay bisha Noofembar 13keeda wuxuu dhammaan doonaa 5:00 galabnimo ee bisha Diisembar 1deeda. Natiijooyinka bakhtiyaanasiibku waxa ay soo bixin doonaa horaanta bisha Janaayo 2018. Waalidiintu waa in ka war hayaan waqtiga kama dambeysta ah inuu ka soo hormaray sanadihii hore.

**Xeerka Daryeelka Caafimaadka La Awoodi karo(Affordable care act):** qoysaska aan ka haysan daryeel caymis caafimaad cida ay u shaqeeyaan ama meelo kaleba, waxa ku soo socota taariikh muhiim ah: Bisha Diisembar 15keeda waa maalinta kama dambeysta ee aad codsan karto Daryeelka Caafimadka La Awoodi Karo ee sanadka 2018, ama loo yaqaano Obamacare.

Waqtiga kama dambeysta ahi wuu ka soo hore maray sanadkan 2017, waxa aad hore u haystay ilaa bisha Janaayo 31keeda in aad codsato. Dadka aan awoodi karayn caymis caafimaad laakiin doortay in aanay ku dhicin ganaax lacageed, sidoo kale loo yaqaanay “Ku Waajibinta Qof Kasta.” Qof kasta oo raba inuu helo caymis caafimaad waa in uu tagaa halkan [healthcare.gov](#).

Qaar ka mid ah dadweynaha degan gobolka Oregon waxa ay xaq u yeelan karaan iyada oo la eegayo da’dooda, dakhliga soo gala, naafanimada iyo deegaanka ay degan yihiin Qorshaha Caafimaadka Oregon(OHP). Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa halkani [plan’s website](#).